



ma og tiihiin wuxuu Rabigiin yiri, waxay dheheen: Ilaahay iyo Rasuulkiisaa og, wuxuu yiri: adoomadayda waxaa waagu u baryey iyago midna i rumeeeyey midna kufriyey

Sayd Binu Khaalid Aljuhani Ilaahay ha ka raali noqde waxaa laga wariyey inuu yiri: Rasuulkii Ilaahay naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate ayaa nagu tujiyey salaadii subaxa xudeybiya iyado habeenkaas roob da'ay markuu salaadii ka baxay ayuu dadka ku soo jeestey, wuxuuna yiri: ma og tiihiin wuxuu Rabigiin yiri, waxay dheheen: Ilaahay iyo Rasuulkiisaa og, wuxuu yiri: adoombayda waxaa waagu u baryey iyago midna i rumeeeyey midna kufriyey, qofkii yiraahda: ilaahay fadligiisa iyo raxmadiisa ayaa roobku noogu da'ay, waa mid I rumeeeyey kuna kufriyey xidiga, qofkase yiraahda xidig hebel iyo hebel, kaasi wuu igu kufriyey wuxuuna rumeeeyey xidiga.

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate salaada subax ayuu ku tukaday xudeybiya - waa tuulo u dhow Makkah- roob habeenimadii ra`ay ka dib. Markuu salaama naqsaday salaadiina ka baxay ayuu wajigiisa u soo jeediyey xaga dadka, wuxuuna yiri: ma og tiihiin waxa rabigiin casa wajala yiri.? Waxay ku jawaabeen: Ilaahay iyo Rasuulkiisaa og. Wuxuu yiri: Ilaahay wuxuu cadeeyey in dadku labo qaybood noqonayaan marka roobku da'aayo: qayb Ilaahay rumaysan, iyo qayb Ilaahay ku kufrida. Qofka dhaha: fadliga Ilaahay iyo naxariistiisa ayaa roobku noogu da'ay, oo roobka di'idiisa Ilaahay kor ahaaye u tiiriya, kaasi waa mu'umin rumeeeyey Ilaaha khaaliqa ah ee kownka maamula, kuna kufriyey xidiga. Qofka yiraahda: xidig hebel iyo hebel buu roobku noogu da'ay, kaasi Ilaahay ayuu ku kurfiyey, wuxuuna rumeeeyey xidiga, taasina waa gaalnimo yar, waayo wuxuu u tiiriyeey di'ida roobka xidiga, taasna Ilaahay uma yeelin sabab sharci ah iyo mid qadar ah toona. Qofkiise roobka di'idiisa iyo dhacdooyinka kale ee dhulka ka dhaca u tiiriya dhaq-dhaqaaqa xiddigaha iyo soo bixitaankooda iyo dhicitaankooda, isagoo rumaysan in xidiguuh yihiin kuwa xaqiiqo ahaan ficiilka wada, taasi waa kufrigii kufrinimada u waynaa.

النّجّات الخيريّة
ALNAJAT CHARITY

